OSLO UNIVERSITETSSYKEHUS

Tolkenett AS
Schweigaardsgate 12
0185 Oslo
Org. nr. 993 965 294
TOLKENETT www.tolkenett.no
Emilie Bredde

# Ogolaansho ku saabsan cilmi-baaris la xiriirta cudurrada lafaha iyo murqaha – oo ay ku jiraan daraasado ku saabsan tayada adeegyada iyo cilmi-baaris ku saabsan adeegyada caafimaadka

## In muunadaha baaritaannada iyo xogtaada caafimaad loo isticmaalo cilmi-baaris

Marka lagaa baarayo oo lagaa daweynayo cudurkaaga la xiriira lafaha iyo murqaha, waxaa badanaa loo baahan doonaa in lagaa qaado muunado ah unugyo, dhiig, kaadi, ama dheecaanada kale ee jidhka si loo ogaado cudurka saxda ah. Sidoo kale, xogta caafimaadka oo ku saabsan cudurkaaga ayaa lagu kaydin doonaa faylkaaga caafimaad.

Waxaan ku weydiinaynaa inaad noo ogolaatid in aan isticmaalno qaybaha ka soo hadhay baaritaanadaas, sidoo kale haddii loo baahdo, in aan qaadno baaritaanno/muunado dheeraad ah oo loogu talagalay Bangiga Cilmi-baarista ee Qaybta cudurrada lafaha iyo murqaha, Cudurrada Maqaarka iyo Cudurrada Infekshanka (FBB RHI). Waa baaritaanno/muunado yar oo dheeraad ah oo aan xad-dhaaf ahayn.

Waxaanu ku weydiinaynaa in marka aanu isticmaalayno baaritaanna/muunadaha, in aad sidoo noo oggolaan kartid in aanu xogtaada qaybta khusaysa daraasadda ee ku saabsan adiga iyo cudurkaaga aanu u isticmaali karno cilmi-baarista cudurrada lafaha iyo murqaha, hubinta tayada adeegyada, iyo cilmiga ku saabsan adeegyada caafimaadka. **Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cilmi-baaristan waxaad ka heli kartaa boggayaga internetka ee** Warbixin guud oo ku saabsan daraasad cilmiyeed.. Waad nala soo xiriiri kartaa haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

## Baahida loo qabo cilmi-baaris

Dhakhaatiirta iyo cilmi-baarayaasha ka shaqeeya Cusbitaalka Jaamacadeed ee Oslo waxay si joogto ah ugu shaqeeyaan horumarinta baarista iyo daaweynta cudurrada lafahaha iyo murqaha. Baaritaannada/muunadaha ayaa ah aasaaska muhiimka ah ee cilmi-baarista, gaar ahaan marka lagu daro xogta caafimaadka.

### In muunadaha/baaritaannada lagu kaydiyo bangiga cilmi-baarista ee FBB RHI
Haddii aad ogolaato, waxaan baaritaannada/muunadaha lagaa qaaday ku kaydin doonaa Bangiga Cilmi-baarista ee FBB RHI, si loo isticmaali karo mustaqbalka marka la samaynayo cilmi-baaris la ogolaaday. Isticmaalka baaritannada/muunadaha waa in cilmi-baaris kastaa ay marka hore ogolaansho ka hesho Guddiga Anshaxa Cilmi-baarista Caafimaadka ee Gobolka (REK). Bangiga cilmi-baaristu wuu jiri doonaa inta loo baahan yahay, taas darteed ma jirto waqti xaddidan. Dakhtar Sare Øyvind Molberg ayaa ah masuulka bangiga xogta cilmi-baarista.

### Xogta lagu ururinayo diiwaanka cilmi-baarista NOSVAR
Bukaanada qaba cudurrada lafaha iyo murqaha waxaa lagu daweeyaa goobo kala duwan oo ku yaalla Norway. Haddii aad ogolaato, xogtaada ku kaydsan qaybaha kala duwan ee Isbitaallada Oslo (tusaale ahaan faylka bukaanka, sawirrada raajada, shaybaarada, iyo diiwaannada tayo-dhowrka) ayaa la isugu keeni doonaa diiwaan cilmi-baaris oo loogu talagalay cudurrada lafaha iyo murqaha  oo la dhaho NOSVAR. Haddii loo baahdo, waxaan sidoo kale rabnaa inaan isticmaalno xogta ku kaydsan isbitaalada kale, goobaha adeegyada caafimaadka ee takhasusleyda ah, ama dhakhtarkaaga gaarka ah.
Waxaan sidoo kale ku weydiisaneynaa ogolaanshahaaga in aan xog ka soo qaadano diiwaanada caafimaadka ee muhiimka ah sida Diiwaanka Kansarka, Diiwaanka Dhalmada, Diiwaanka Sababta

Geerida, Diiwaanka Qaranka ee Bukaanada, iyo Diiwaanka Daawooyinka la qoray iyo kuwo kale. Xogtan waxaa lagu maamuli doonaa laguna keydin doonaa kayd dijitaal ah oo la ogolaaday. Dhakhtar sare Øyvind Molberg ayaa ah hoggaamiyaha iyo masuulka diiwaankan.

Masuuliyadda guud ee maareynta xogtan caafimaadka waxaa iska leh Agaasimaha guud ee Isbitaallada Oslo. Waxaa sidoo kale la sameyn doonaa liis tixraac ah oo muujinaya muunadaha/baaritaannada lagu keydiyay bangiga cilmi-baarista iyo cudurrada aad qabto ee la xiriira xogta la kaydiyay. Diiwaanka iyo liiska tixraaca ah waxaa la hayn doonaa ilaa inta loo baahaan yahay. Ogolaanshaha sii-haynta xogtan waxaa la codsan doonaa in la cusboonaysiiyo ilaa intii loo arko in loo baahan yahay diiwaanka.

Ogolaanshaha aad bixiso waxaa lagu kaydin doonaa diiwaan elektaroonik ah. In muddo ah waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan sida loo isticmaalayo diiwaanka ballaaran ee cilmi-baarista iyo bangiga xogta cilmi-baarista.

### Isticmaalka xogta ku saabsan adiga iyo cudurkaaga

Baaritaannada/muunadaha waxay ka mid noqon karaan cilmi-baarisyo kala duwan, oo ay ku jiri karaan baaritaanno la xiriira hidde-sidaha. Baaritaannada hidde-sidaha oo dhan waxay khuseyn doonaan cudurkaaga lafaha/murqaha waxaana laguu sheegi doonaa natiijooyinka soo baxay ee muhiimka u ah cudurkaaga, daaweyntaada, ama caafimaadkaaga. Marka la samaynayo daraasadaha cilmi-baarista, badanaa waxaa loo baahan yahay in natiijooyinka muunadaha/baaritaannada la barbardhigo xogtaada caafimaad ee ku saabsan adiga iyo cudurkaaga. Xogta caafimaadka waxay laga heli karaa diiwaanka cilmi-baarista cudurrada lafaha iyo murqaha ee NOSVAR, diiwaannada daaweynta ee Isbitaallada OUS, isbitaalada kale, takhasusleyda, ama dhakhtarkaaga gaarka ah.

Baaritaanada lagu sameeyo muunadaha, xogta ku jirta diiwaanka cilmi-baarista, iyo xogta caafimaadka ee kugu saabsan ee ka mid noqonaya cilmi-baaris waxaa laga reebayaa wixii qofka lagu aqoonsan karo. Tani micnaheedu waa in magacaaga iyo lambarkaaga dhalashada lagu beddelo kood sir ah. Liiska xiriirinaya magacaaga iyo koodka waxaa loo kaydin doonaa si gaar ah oo ka soocan xogta kale. Kaliya shaqaalaha loo fasaxay ee ka shaqeeya isbitaalka ayaa heli kara liiskaas.
Baaritaannada/muunadaha lagaa qaaday iyo xogta caafimaadkaaga, ayaa sidoo kale waxaa isticmaali kara kooxo cilmi-baaris oo kale oo nala shaqeeya oo Norway ama waddamo kale. Waxaa ku jiri kara dalal heerka ilaalinta xogta qofku ka hooseeyso kan Norway, laakiin xogtaada mar walba waxaa laga reebay wax lagugu aqoonsan karo. Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan halka xogtaada lagu isticmaalay, waxaad la xiriiri kartaa isbitaalka.
In la daabaco natiijooyinka cilmi-baarista ayaa ah qayb muhiim ah oo ka mid ah cilmi-baarista. Dhamaan natiijooyinka la daabaco waxaa loo soo bandhigi doonaa hab aan qofka gaar ahaan loo aqoonsan karin. Si kastaba, waxaa muhiim ah inaan kuu sheegno in aan gebi ahaanba meesha laga saari karin in lagu aqoonsan karo.

Dhammaan daraasadaha waa in loo maraa hab sharciyeed oo waafaqsan xeerarka ilaalinta xogta qofka.

### Waa maxay Faa'iidooyinka iyo khasaarooyinka suurtagalka ah ee ka qaybgalka cilmi-baarista?
Daraasadaha cilmi-baaristu wax saamayn ah oo toos ah ma ku yeelan doonaan daawaynta aad helaysid wakhtiga la joogo. Si kastaba, waxaa laga faa'idi karaa aqoon qiimo leh oo kor u qaadi karta fahamka cudurka, habka ogaanshaha cudurrada iyo daaweynta. Haddii natiijooyin muhiim ah laga helo muunadahaaga oo saameyn ku yeelan kara cudurkaaga ama caafimaadkaaga,waan kula soo xiriiri doonnaa.

### Ikhiyaar iyo helitaanka xogta
Ka qaybgalka cilmi-baarista waa mid ikhtiyaari ah. Ma kaydin karno muunadaha ama xogta kugu saabsan



TOLKENETT
Tolkenett AS
Schweigaardsgate 12
0185 Oslo
Org. nr. 993 965 294
www.tolkenett.no
Emelie Bredde

haddii aanad bixin ogolaansho qoraal ah. Haddii aad go'aansato in aad dib uga laabato ogolaanshahaaga, wax saameyn ah kuma yeelan doonto daaweyntaada ama adeegyada caafimaadka ee isbitaalka ka hesho, isla markaana muunadahaaga kaydsan waa la burburin doonaa, xogta kugu saabsana waa la tirtiri doonaa. Si kastaba, xogta durba ka mid noqotay daraasado cilmieed lama tirtiri karo, laakiin looma isticmaali doono daraasado cusub.

Waxaad xaq u leedahay in lagu tuso xogta kugu saabsan ee la kaydiyay iyo in aad codsato sixitaan haddii ay jiraan khaladaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan diiwaanka, waxaad la xiriiri kartaa isuduwaha diiwaanka Torhild Garen oo laga helayo telefoonka 22 02 94 19 ama e-boosta NOSVAR@ous-hf.no. Bangiga xogta cilmi-baarista waxaa lagala xiriiri karaa e-boosta BiobankRHI@ous-hf.no.

### Oggolaanshaha

Guddiga Anshaxa Cilmi-baarista Caafimaadka ee Gobolka (REK) ayaa qiimeeyay oo ogolaaday Bangiga Cilmi-baarista FBB RHI (REK Aqoonsiga codsiga 28255, lambarka codsiga 2016/119). Diiwaanka NOSVAR waxaa loo aasaasay si waafaqsan shuruucda ilaalinta xogta qofka.

Sida uu dhigayo xeerka xogta qofka,  Cusbitaalka Jaamacadeed ee Oslo iyo masuulka bangiga cilmi-baarista/diiwaanka, Dr. Øyvind Molberg, ayaa laga rabaa inay mas'uuliyad buuxda iska saaran ilaalinta in xogtaada si sharci ah loo maareeyo. Mashruucan wuxuu leeyahay sal sharci oo ku saleysan Xeerka Ilaalinta Xogta ee Midowga Yurub (GDPR) qodobka 6 lr. 1a iyo qodobka 9 lr. 2a iyo oggolaanshahaaga.

Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho u gudbiso Hay'adda Kormeerka Ilaalinta Xogta qofka (Datatilsynet) haddii aad qabtid walaac ku saabsan habka loo maareeyo xogtaada.

Wakiilka ilaalinta xogta ee Isbitaallada Oslo waxaa lagala xiriiri karaa e-boosta personvern@oslo-universitetssykehus.no.

TOLKENETT
Tolkenett AS
Schweigaardsgate 12
0185 Oslo
Org. nr. 993 965 294
www.tolkenett.no

Emilie Bredde

## Ogolaansho ku saabsan cilmi-baarista cudurrada lafaha iyo murqaha oo la isticmaalayo muunooyin baaritaan iyo xog kale

**Ogolaanshaha waxaa bixin kartaa adiga oo saxiixaya halkan ama elektaroonik ahaan adiga oo adeegsanaya QR-koodhka hoose**

Waxaan ogolaanayaa in muunadahabaaritaannada  iyo xogaha caafimaad ee la xiriira ee igu saabsan loo isticmaali karo cilmi-baaris mustaqbalka ah oo ku saabsan cudurrada lafaha iyo murqaha.

Taariikh: ____________Saxeex (bukaan): ____________________________________________________

QR-kood loogu talagalay saxiixa elektarooniga ee ogolaanshaha
Isticmaal kamaradda taleefankaaga casriga ah oo iskaangaree sawirka hoose, waxaanad markaa si toos ah laguu geyn doonaa bogga internetka ee saxiixa

QR-kood

| | | |
|---|---|---|
| Magac:<br><br>Lambar dhalasho (11 lambar):<br><br>ICD10-kood: | | |

TOLKENETT
Tolkenett AS
Schweigaardsgate 12
0185 Oslo
Org. nr. 993 965 294
www.tolkenett.no
Emilie Bredde